Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay https://go.usa.gov/xtBQC.

Agoosto 11, 2022

Ku socota: Dhammaan ka qayb qaatayaasha ODDS, hawl wadaagayaasha iyo shaqaalaha
Ka socota: Anna Lansky, Agaamise Ku-xigeenka, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS)
Ujeedada: Warbixinta cusub ee Mashruuca Qorshe Dejinta, talooyinka

Warbixintii u dambeysay ee Mashruuca Qorshe Dejinta waa la dhammeystiray. Waxay ku talinaysaa sida ODDS u wanaajin karto maamulka kiiska ee dhanka nidaamka adeega ee naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) ee Oregon. Warbixinta ka akhri internet-ka iyada oo ku qoran luqaddo badan. Qaar ka mid talooyinka la soo jeediyay waxay sidoo kale ku qoran yihiin hoosta.

Way mahadsan yihiin, dhammaan dadkii gacanta ka geystay sameynta warbixintani oo dadka la wadaagay jawaab celinta: Kooxda Qorshe Dejinta, dadka naftooda u dooda iyo qoysaska, bulshada iyo ururada wax u dooda, hay'adaha maamulka kiiska, hay'adaha daryeelka bixiya, shaqaalaha ODDS, iyo damaanad qaadayaasha kulamada kooxaha ee diiradda wax lagu saaro.

Taariikhda

ODDS ayaa bilawday Kooxda Qorshe Dejinta si loo abuuro nidaamka maamulka kiiska oo ay si fudud u istcimaali karaan carruurta iyo dadka waaweyn ee qaba I/DD. Waxaan rabnaa in aan taageerno qof kasta si uu gaaro wax kala doorashadiisa u gaarka ah iyada oo aan la eegayn halka uu ku nool yahay, luqadda uu ku hadlo iyo sida uu wax ula xiriiro.

Dayrtii 2018-kii, ODDS ayaa qandaraas la yeelatay Shaqaalaha Maamulka Caafimaadka (HMA) si ay u soo ururiyaan ra'yi ka socda qiyaastii 1,000 ka mid ah hawl wadaagayaasha, dadka naftooda u dooda iyo dadka kale ee ka qayb qaata nidaamka I/DD ee Oregon. ODDS ayaa sameysay Kooxda Qorshe Dejinta Maamulka Kiiska oo ay ku jiraan dadka qaba I/DD, xubnaha ka tirsan qoyska, xirfadlayaasha maamuulka kiiska, dadka wax u

dooda iyo daryeel bixiyayaasha. Waxay calmi-baaristii HMA u adeegsadeen si loo qoro warbixintii bilowga ahayd.

ODDS ayaa isku keentay jawaab celinta oo ku saabsan warbixinta iyada oo la isticmaalayo ra'yi ururin. Dadka naftooda u dooda iyo qoysaska ayaa noo sheegay in habkani loo helayo jawaab celintoodu aanu si fiican u shaqeynin. Ka hor intii aynaan hagaajin karin nidaamka jawaab celinta, cudurkii baahsanaa ayaa dib u dhigay mashruuca.

Sanadkii hore, waxaan bilawnay mashruuca oo la shaqeynay ururada bulshada iyo kooxaha wax u dooda si loo qabto kulamada kooxaha oo diiradda wax lagu saarayo. Kulamadani dhageysiga waxaa lala qabtay qoysaska iyo dadka qaba I/DD si loo soo ururiyo jawaab celin oo looga jawaabo su'aalaha.

Kooxda Qorshe Dejinta ayaa kulantay horraantii 2022 waxayna jawaab celintani u adeegsadeen in dib loo eego warbixinta. Waxaanu ku faraxsanahay in aanu dadka la wadaagno talooyinka ay soo jeediyeen iyo si hore loogu sii wado mashruuca. Xubnaha kooxda ayaa ku qoran Lifaaqa A ee warbixinta cusub.

Talooyinka warbixinta

Kooxda ayaa sameysay toddoba talo soo jeedin oo ay ku jiraan hadafyo, ujeeddooyin iyo istiraatijiyado. Halkan waxaa ku qoran hadafyada. Wixii faahfaahin dheeraad ah, ka akhri warbixinta dhanka internet-ka.

- Maamulayaasha kiisku oo dhan waxay haystaan waqti iyo awood ay diirada ku saaraan dhinacyada wada xiriirka ee lagu taageerayo dadka qaba I/DD iyo qoysaskooda. Maamulayaasha kiisku waa kuwo la heli karo, aqoon leh oo jawaab bixiya.
- Dhammaan dadka helaya taageerada I/DD waxay leeyihiin kala doorasho macno leh oo la dooranayo ha'yada maamulka kiiska oo tayo leh iyo helitaanka adeegyada maamulka kiiska oo waafaqsan baahiyahooda qofka iyo waxyaabaha ay doorbidayaan.
- Dadka oo dhan waxay helaan adeegyada maamulka kiiska ee I/DD loo oo wada siman yahay oo dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba wax jawaabta u noqonaya oo ixtiraam leh.
- Dhammaan dadka iyo qoysaskoodu waxay awoodaan in ay helaan taageerada qofka ku saleysan I/DD oo ka turjumaya baahiyahooda, waxa ay doonayaan iyo kala doorashadooda hay'adaha maamulka kiiska oo aqoon fiican u leh fikirka iyo qorsheynta qofka ku saleysan.
- Dhammaan dadka qaba I/DD iyo qoysaskoodu waxay awoodaan in ay helaan oo fahmaan macluumaadka ay u baahan yihiin ee ku saabsan

taageerada I/DD, waxayna heli karaan kala doorasho dhanka wada xiriirka oo dabacsan isla markaana hufan oo buuxinaya baahiyahooda.
- Tayada iyo la xisaabtanka ka qayb qaadashada hawl wadaagayaasha bulshada, oo ay ku jiraan dadka iyo qoysaska leh caqabadaha la xiriira ka qayb qaadashada, ee dhanka isbeddelka nidaamka gobolka iyo in nidaamyada go'aan gaarida si joogto ah loo taageero.
- Waxqabadka maamulka kiiska iyo is waafajinta lacag bixinta iyada oo hadafku qofka ku saleysan yahay.

Tallaabooyinka xiga

ODDS iyo qandaraaslaha ayaa la shaqeyn doona dadka hela adeegyada I/DD, qoysaskooda iyo hawl wadaagayaasha bulshada si loo dejiyo qorshe ku saleysan warbixinta. Hadafkayagu waa in la abuuro nidaamka maamulka kiiska ee bixinta adeega taasi oo ay fududahay in la hago, loo wada siman yahay, daahfurnaan leh iyo waxyaabo badan.

Inaga oo ka gudbayna wejiga xiga ee Mashruuca Qorshe Dejinta, waanu kula socodsiin doonaa macluumaadka cusub ee ku saabsan horumarka aan sameynayno.

Si Daacadnimo leh,

Anna Lansky
Agaamise Ku-xigeenka
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqowww.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.